MONIHELI

# Ka gudbidda waxbarashada aasaasiga ah iyo u gudbidda waxbarashada heerka labaad


OmaPolku

# Waajibka waxbarashadu wuu sii soconayaa waxbarashada aasaasiga ah kaddib

Waajibka waxbarashadu wuxuu waajinka ka dhigayaa, in uu ardaygu waxbarashadiisa sii wato waxbarashada aasaasiga ah kaddib. Waxbarashooyinka waxay ka sii soconayaa waxbarashada heerka labaad. Waajibka waxbarashadu wuxuu dhammaanayaa, marka uu ardaygu buuxiyo 18 sano ama marka uu taas kahor dhammeey waxbarashada heerka labaad.

Waajibka waxbarashada ee ka dambeeya waxbarashada aasaasiga ah waxaa inta badan lagu fuliyaa waxbarashada heerka labaad. Waxbarashada heerka labaad waxay ka koobantahay waxbarashada dugsiga sare iyo waxbarashada xirfadda.

Waxaa intaas dheer, in waajibka waxbarashada lagu gudan karo waxbarashada diyaarinta ah ee isgasha, sida waxbarashada TUVA, waxbarashada machadka dadka waaweyn ee loogu talaggalay dadka uu saaranyahay waajibka waxbarashada iyo waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn. Ardayda u baahan taageerada gaarka ah ee xooggan waxay codsan karaan waxbarashada TELMA, taas oo u tababarta shaqada iyo nolosha xorta ah.



# Waxbarashooyinka heerka labaad ee waxbarashada aasaasiga ah kaddib

## Waxbarashada dugsiga sare waxaa lagu qaataa dugsiga sare

Dugsiga sare waxaa lagu bixiyaa waxbarashada aqoonta guud ah ee dugsiga sare. Waxbarashada dugsiga sare lagama barto wax xirfad ah. Waxbarashada dugsiga sare kaddib, ardaygu wuxuu waxbarashada ka sii wadan karaa jaamacadda ama dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha. Sida caadiga ah codsayaasha jaamacadaha ee Finland joogo waxay heystaan shahaadada dugsiga sare.

Waxbarashada dugsiga sare waxay inta badan qaadataa saddex sano. Waxbarashada waxaa ku jira waxbarashooyin qasab ah iyo kuwa la dooranayo. Ardayga dhammeeyay caddada waxbarashada dugsiga sare wuxuu helayaa shahaado.

Ardaygu wuxuu sidoo kale dhammaadka dugsiga sare ka qaybgeli karaa imtixaanaadka dugsiga sare lagu dhammeeyo. Waxaa loola jeedaa, in uu gelayo imtixaanaadka maaddooyin kala duwan. Ardayga ka qaybqaata imtixaanaadka lagu dhammeeyo dugsiga sare wuxuu samaynayaa imtixaanka shahaadada dugsiga sare (YO-tutkinto).

Ardayga qaataa shahaadada imtixaanaadka dugsiga sare wuxuu helayaa u qalmidda guud ee sii wadashada waxbarashada. Waxaa loola jeedaa, in uu codsan karo wax ku barashada dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha ama jaamacadda. Dhammaynta cadadda waxbarashada dugsiga sare oo aanay la socon shahaadada dugsiga sare ka dambaysa waxaa lagu helayaa u qalmidda codsashada dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha, laakiin laguma helayo jaamacadda.

## Waxbarashada shahaadada xirfadda aasaasiga ah waxaa lagu qaataa machadka xirfadda

Waxbarashada shahaadada xirfadda aasaasiga ah waxaa lagu qaataa machadka xirfadda. Shahaadada waxay bixinaysaa u diyaarsanaanta aasaasiga ah ee hawlaha laan xirfadeedkaas, ganacsadenimada iyo aqoonta xifadeed ee nolosha shaqada looga baahanyahay.

Waxbarashada shahaadada aasaasiga ah ee xirfaddeed waxay qaadataa inta badan saddex sano. Waxbarashada waxaa ku jira qaybo qasab ah iyo kuwa la dooranayo. Shahaadadooyinka xirfaddu waa toban xirfadeed oo laamo kala duwan ah. Adeegga ePerusteed ee internetka ayaa looga hadlayaa shahaado kasta oo aasaasi ah.

Ardayga qaataa shahaadada xirfadda ee aasaasiga ah wuxuu helayaa u qalmidda guud ee sii wadashada waxbarashada. Wuxuu aqoontiisa ku soo qota-dheereyn karaa waxbarashada xirfadda ama xirfadda gaarka ah ama wuxuu codsan karaa wax ku barashada dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha ama jaamacadda. Arday badan oo dhigta dugsiga tacliinta sare ee xirfaduhu waxay markii hore qaateen shahaadada xirfadda ee aasaasiga ah kaddibna waxay yeesheen waayo-aragnimo shaqo.

## Labada shahaado waxay isku xirtaa waxbarashada xirfadda aasaasiga ah iyo tan dugsiga sare

Waa suuraggal in waxbarashada heerka labaad lagu qaado labo shahaado. Labada shahaado waxaa loola jeedaa, in ardaygu uu ka sokow waxbarashada shahaadada aasaasiga ah ee xirfadda uu qaato maaddooyinka dugsiga sare. Ardaygu wuxuu sidoo kale ka qaybgeli kartaa imtixaanaadka dhammaynta dugsiga sare isagoo qaadan kara shahaadada dhammaynta dugsiga sare (YO-tutkinto).

## Waxbarashada xirfadda aasaasiga waxaa sidoo kale lagu qaadan karaa heshiiska waxbarashada iyo shaqada isugu jira

Inta badan waxbarashada xirfadda ee qaybta ka ah heshiiska waxbarashada iyo shaqada isla socda waxaa iyadoo shaqo qabasho rasmi ah lagu qaataa goobta shaqada. Ardaygu wuxuu ku jiraa xiriir shaqo wuxuuna sidoo kale waxbarashada qoraalka ah ku qaadanayaa machadka xirfadda.

# Waxbarashooyinka diyaarinta ah iyo waxyaabaha kale ee la kala dooran karto kahor heerka labaad ee waxbarashada

## Waxbarashada diyaarinta ah ee shahaadada (TUVA)

Waxbarashada diyaarinta ah ee shahaadada TUVA waxay xoojisaa aqoonta uu ardaygu uga soo bixi karo waxbarashada heerka labaad. Hadafka waxbarashada TUVA waa, in ardaygu uu galo waxbarashada heerka labaad ee uu doonayo inta uu waxbarashada TUVA ku jirto ama kaddib.

Waxbarashada TUVA waxay qaadataa ugu badnaan sannad. Inta waxbarashada lagu jiro wuxuu ardaygu sare u qaadi karaa dhibcihiisa waxbarashada aasaasiga ah, wuxuu samayn karaa maadooyinka dugsiga sare ama xirfadda u diyaar ahaanshihiisa waxbarashadana wuu xoojin karaa. Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo hagitaan shakhsi ah iyo hagitaannada kale ee loo baahanyahay si loo dhammeeyo waxbarashada TUVA.

**Waxbarashada TUVA waa kugu habboontahay, haddii:**

- uu ku saaranyahay waajib waxbarasho.
- aad dhammaysay waxbarashada aasaasiga ah ama waxbarasho u dhiganta.
- aad u baahantahay wakhti dheeraad ah oo aad waxbarashada ku xulato, aad doonayso in aad sare u qaaddo dhibcaha waxbarashada aasaasiga ah ama aad doonayso in aad soo indha-indhayso fursadaha sii wadashada waxbarshada ee kala duwan.
- aad doonayso in aad xoojiso aqoontaada afka finnishka ama iswiidhishka, kahor inta aadan u gudbin waxbarashada heerka labaad.
- aad tahay qaangaar, laakiin aadan weli dhammayn waxbarashada heerka labaad.

Waxaa sidoo kale waxbarashada TUVA loogu yeerayaa waxbarashada marxaladda isgalka. Laga billaabo Agoosto 2022 waxbarashada TUVA waxay beddeleysaa waxbarashooyinka hore ee marxaladaha isgalka: fasalka tobanaad, LUVA iyo VALMA.

## Waxbarashooyinka sannadka machadka ee loogu talaggalay dadka uu saaranyahay waajibka waxbarashada

Waxbarashada sannadka machadka ee loogu talaggalay dadka uu saaranyahay waajibka waxbarashada waxaa loogu talaggalay dadka dhammeeyay waxbarashada aasaasiga ah ee uu saaranyahay waajibka waxbarashadu. Ardaygu wuxuu waxbarshada ku hagaajin karaa dhibcaha waxbarashada aasaasiga ah, wuxuu ugu diyaargaroobi karaa waxbarashooyinka heerka labaad wuxuuna noloshiisa ugu raadin karo jiho. Waxbarashada waxaa qabanqaabiya machadka dadka waaweyn. Waxbarashada sannadka machadka ee loogu talaggalay dadka uu saaranyahay waajibka waxbarashada waxay qaadataa hal sannad-dugsiyeed. Waxbarashadu waxay ka koobantahay waxbarashooyin wadajir ah oo dadka oo dhan loogu talaggalay iyo maaddooyinka uu xiisaynayo ee uu xushay.

## Waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn (AIPE)

Waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn AIPE waa waxbarasho aqoon guud ah Waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn wuxuu ardaygu ku qaadan karaa cadadda waxbarashada aasaasiga ah wuxuuna ku heli karaa shahaadada dugsiga dhexe, wuxuu sare ugu qaadi karaa dhibcaha shahaadada dugsiga dhexe, maaddooyinka waxbarashada aasaasiga ahna wuu ku qaadan karaa.

Billowga waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn wuxuu ardaygu helayaa qorshe waxbarasho oo isaga u gaar ah. Qorshaha waxbarashada ee gaarka ah waxaa loo dhisayaa qaab waafaqsan, maaddooyinka uu ardaygu u baahanyahay, si uu u gaaro hadafkiisa waxbarashada.

Waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn waxay ka koobantahay labo marxaladood. Waxbarashooyinka marxaladda hore waxay u dhigmaan maaddooyinka fasallada 1aad-6aad ee waxbarashada aasaasiga ah. Ardaygu wuxuu marxaladda hore ku baranayaa aqoonta wax qoris-akhrinta, haddii aanu aqoonin ama ay qabyo ka yihiin. Waxbarashooyinka marxaladda dhammaynta ah waxay u dhigmaan maaddooyinka fasallada 7aad-9aad ee waxbarashada aasaasiga ah.

Marxaladda billowga iyo dhammaadku waxay qaataa 1–2 sano. Wakhtiga ay waxbarashada aasaasiga ah ee qoyka weyn ay qaadato waa mid shakhsiga ku xiran.

**Waxbarashada aasaasiga ah waa kugu habboontahay, haddii:**

- aad tahay 17 sano jir ama ka weyn.
- aad u baahantahay shahaadada waxbarashada aasaasiga ah ama u diyaarnoqoshada waxbarashada, si aan u sii wadato waxbarashada heerka labaad.
- aad doonayso in aad sare u qaaddo dhibcahaada waxbarashada aasaasiga ah ama aad doonayso in aad qaadato hal ama dhowr maaddo oo waxbarashada aasaasiga ah.
- aad u baahantahay waxbarashada marxaladda koowaad ee waxbarashada aasaasiga ah, sida aqoonta wax akhri-qorista ama xisaabta.

Waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn waxay ku habboontahay tusaale ahaan ardayga Finland u soo guuray isagoo ku jira marxaladda dhammaadka dugsiga dhexe, kaas oo aanan ka gaarin in uu waxbarashada aasaasiga ah dhammeeyo kahor inta aanu qaangaarin.

## Waxbarashada diyaarinta ah ee shaqada iyo nolosha xorta ah (TELMA)

Waxbarashada diyaarinta ah ee shaqada iyo nolosha xorta ah TELMA waxaa loogu talaggalay ardayda taageerada gaarka ah u baahan. Waxbarashada TELMA waa waxbarasho gaar ah. Waxbarashada waxaa lagu bartaa aqoonta uu ardaygu u baahanyahay marka uu joogo guriga, nolosha shaqada ama bulshada dhexdeeda. Waxbarashadu waxay qaadataa ugu badnaan saddex sannadood.

# Sidan ayaad u codsan kartaa booska waxbarashada

## Codsiga wadajirka ah ee waxbarashada ka dambeysa waxbarashada aasaasiga ah waa bilaha Febraayo-Maarso

Codsiga wadajirka ah waa nidaam codsi oo dalka dhan ah, kaas oo hal meel looga codsado waxbarashada heerka labaad ka dambeysay waxbarashada aasaasiga ah. Codsiga wadajirka ah ee waxbarashada heerka labaad waxaa la qabanqaabiyaa sannadkiiba halmar, bilaha Febraayo-Maarso.

### Yaa codsan kara?

Dhammaan ardayda fasalka 9aad waxaa saaran waajibka codsashada. Waa ku qasab in ay boos waxbarasho ku codsadaan codsiga wadajirka ah ee guga ee ka dambeeyay waxbarashada aasaasiga ah. Codsiga wadajirka ah ee guga waxaa loogu talaggalay sidoo kale codsadayaasha dhammeeyay waxbarashada aasaasiga ah, kuwaas oo aanan dhammayn:

- cadadda waxbarashada dugsiga sare
- waxbarashada xirfadda ama
- waxbarashada dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha

### Waxbarashooyinkee la codsan karaa?

Codsiga wadajirka ah ee guga waxaa lagu codsan karaa ugu badnaan todobo waxbarasho. Codsigu wuxuu ka dhacayaa adeegga shabakadda ee Opintopolku.fi. Hal foom oo isku mid ah ayaa waxaa lagu codsadan karaa:

- waxbarashada dugsiga sare
- waxbarashada xirfadda
- waxbarashada TUVA
- waxbarashada sannadka machadka ee loogu talaggalay dadka uu saaranyahay waajibka waxbarashada iyo
- waxbarashada TELMA.

Marka uu wakhtiga codsigu dhammaado kaddib waa in uu codsaduhu ka qaybqaataa haddii loogu yeero imtixaanka gelitaanka ama ku habboonaanshaha waxbarashada. Waxbarashooyinka oo dhan looma qabanqaabiyo imtixaanka gelitaanka ama kun habboonaanshaha waxbarashada.

Xulashooyinka ardayda waxaa inta badan lagu saleeyaa dhibcaha shahaadada dugsiga dhexe. Natiijooyinka gelitaanku waxay soo baxaan bisha Juun. Haddii uu codsaduhu helo boos waxbarasho, waa in uu ku aqbalaa wakhtiga cayiman ee loo qabtay dhexdiisa. Waxbarashadu waxay billaabanaysaa deyrta. Qofka uu waajibka waxbarashadu saaranyahay waa in uu waxbarashada ka qaybgalaa.

## Codsiga ka fiirsashada u baahan waxaa lagu codsan karaa iyadoo aan la haysan shahaadada dugsiga dhexe

Codsiga wadajirka ah ee waxbarashada ka dambeysay waxbarashada aasaasiga ah waxaa la codsan karaa iyadoo aan la heysan shahaadada waxbarashada aasaasiga ah. Xulshada ka fiirsashada ku salaysan waa la isticmaalaa, marka shahaadada dugsiga ee codsadaha aan la barbardhigi karin shahaadada u dhigan ee Finnishka. Haddii uu codsaduhu leeyahay aqoon ku filan oo ku barto waxbarashada heerka labaad, waxaa codsiga ka fiirsashada ku salaysan loogu qaadan karaa waxbarashada dugsiga sare ama waxbarashada xirfadda.

## Codsiga joogtada ah ee waxbarashada ka dambeysay wxbarashada aasaasiga ah wuxuu shaqaynayaa sannadka oo dhan

Codsiga joogtada ah ee waxbarashada ka dambeysay waxbarashada aasaasiga ah wuxuu shaqaynayaa sannadka oo dhan Codsiga joogtada ah waxaa la isticmaalaa, tusaale ahaan marka aanu codsaduhu boos waxbarasho ku helin codsiga wadajir ah. Machayda waxbarashada ayaa codsiga joogtada ah ku go'aaminaya wakhtiyada codsiga, habraaca codsiga iyo sababaha xulashada. Macluumaadka ku saabsan waxbarashooyinka iyo wakhtiyada codsiga iyo weliba sababaha xulasahda waxaa la helayaa bogagga shabakadda ee machadyada ama adeegga shabakadda ee Opintopolku.fi.

**Yaa codsan kara?**

Waad codsan kartaa codsiga joogtada ah, haddii:

- aadan boos waxbarasho ku helin codsiga wadajirka ah ee waxbarashada ka dambeysay waxbarashada aasaasiga ah.
- aad doonayso in aad qaadato waxbarasho xirfadeed ama qaybo ka mid ah waxbarashada
- aad horay u qaadatay waxbarashada heerka labaad ama waxbarashada dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha
- aad leedahay aqoonta nolosha waxbarashada ka heshay.

**Waxbarashooyinkee la codsan karaa?**

Codsiga joogtada ah ee waxbarashada ka dambeysay waxbarashada aasaasiga ah waxaa lagu codsan karaa:

- waxbarashada xirfadda
- waxbarashada TUVA
- waxbarashada sannadka machadka ee loogu talaggalay dadka uu saaranyahay waajibka waxbarashada
- waxbarashada TELMA iyo weliba
- boosaska waxbarashada ee bannaanaada codsiga wadajirka ah ee waxbarashada ka dambeysay waxbarashad aasaasiga ah, sidoo kale waxbarashada dugsiga sare.

Haddii aanan ardayga loo qaadan waxbarashada, machadka ayaa isaga ku hagaya waxbarasho ama adeeg ku habboon.

## Codsiga waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn waxaa lagu sameeyaa machadyada

Codsiga waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn waxaa toos loogu sameeyaa machadyada Waxbarashada aasaasiga ah ee dadka waaweyn waxaa qabanqaabiya dugsiyada srae, machadyada dadweynaha iyo machadyada xirfadda ama machadyada kale ee waxbarashada. Machadyada waxbarashadu iyaga ayaa go'aansanaya waxkhtiyada codsiga iyo xulashooyinka. Macluumaadka ku saabsan waxbarashooyinka iyo wakhtiyada codsiga waxaa la helayaa bogagga shabakadda ee machadyada ama adeegga shabakadda ee Opintopolku.fi.

## Si fiican uga kuurgal

Si dhiiranaan leh ula xiriir hagayaasha waxbarashada. Hagayasha waxbarashada, yacni opot, waxay ka shaqeeyaan dugsiyada. Waxaad iyaga ka heleysaa caawimaad iyo talooyinka, marka aad qorshaynayso waxbarasho, aad codsanayso waxbarashooyin kala duwan ama aad ka fekereyso xirfadda adigga kugu habboon.

Waxaa kale oo aad soo indha-indhaysaa machadyada waxbarashada, tusaale ahaan maalmaha albaabada furan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada heerka labaad, waxbarashada diyaarinta ah iyo waxyaabaha kale ee la kala dooran karo kahor waxbarashada heerka labaad oo ku qoran af finnish iyo ingiriis:

**www.opintopolku.fi**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada heerka labaad oo ku qoran luqado kale:

**www.infofinland.fi**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada sannadka machadka ee loogu talaggalay dadka uu saaranyahay waajibka waxbarashada waxaa luqadda finnishka looga helayaa mashiinka macluumaad raadinta ee waxbarashada machadka dadka.

**www.kansanopistot.fi/koulutukset**